




Ku Laabshada Dugsiga 2021: Mudnaansiinta ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland ee ah Inay Waxbarashadooda Ku Qaataan Qof ahaan Fasalada Dhixdooda



Qoysaska iyo Ardayda PPS,

Waxaan ku faraxsanahay inaan idinku soo dhaweyno Sebtamber 1deeda sanad-dugsiyeed waxbarashadiisa lagu qaadanayo fasalada iskuulka si dhammeystiran todobaadkii shan maalmood.

Marka aynu ku soo dhawaano maalinta ugu horeysa iskuulka, waxaan sii wadaynaa inaan la socono fiditaanka xanuunka COVID-19, oo ay ka mid nooca cusub ee la yiraad Delta, iyo sidii loo hirgalin lahaa lakabyo caafimaad oo lagaga hortagyo xanuunka COVID-19 dhisme kasta oo iskuulada ka mid ah. Ilaa iyo intii uu bilaabmay xanuunkani faafaya, waxaa na haayey khabiirada caafimaadka dadweynaha. Haddaba iyada oo la dhowrayo sida ay nooga go'an tahay, xaggan hoos waxaad ku lifaaqan guud marka **Tallaabooyinka Nabadjelyo Caafimaad ee Lagaga Tagayo COVID-19 anad-dugsiyeedka 2021-2022**, kuwaasi naga caawin doona inay ardayda PPS heli doonaan waxbarasho waqtigeedu dhan yahay oo ay ku qaataan fasalada dhixdooda sanad-dugsiyeedkan.

[Sanad-dugsiyeedka 2021-2022](#)
[Tallaabooyinka PPS ee Nabadjelyo iyo Caafimaad Kana Dhanka ah Xanuunka COVID-19](#)

Tilmaamaha Muhimka ah:

- Inay waafaqsanaanto shuruudaha gobolka, dhammaan shaqaalaha PPS (shaqaalaha aan iskaashigu naga dhexeeyo) iyo ardayda K-12 waxaa looga **baahan yahay inay xirtaan maaskarada** marka ay ku sugar yihiin gudaha iyo basaska iskuulada, iyada oo aan loo fiirin xaaladooda inay tallaalan yihiin iyo in kale.

- PPS waxa ay haystaan in ka badan **1.7 malyuun** oo ah maaskarada kuna haboon da' kasta looguna talogalay dhammaan iskuuladeena oo dhan kuwooda u baahan.
- **Saddexda (3) fuudh ay isku jirsanayaan** ardayda iyo shaqaalaha waa la sii wadayaan, intii suurtagal ah.
- **Siifeeyaasha hawada filterada ee HEPA waxay yeelaan fasal kasta** iyo basaska iskuuladaba.
- Wuxaan kor u qaadaynaa filterada hawada **MERV 13 oo isku nooc ah dhismayaasha** iskuul kasta.
- Wuxaan sii wadayaan inaan bixino **baaritaan xanuunka COVID-19** ardayda iyo shaqaalaha leh astaamaha xanuunka.
- Fasal kasta waxaa si joogta ah looga heli doonaa agabka lagu nadiyo gacmaha iyo jeermiska.
- Booqdayaasha iyo mutadawiciinta waxaa loo oggolaan doonaa inay yimaadaan dhismayaasha iskuulada iyaga oo looga baahan yahay inay xirtaan maaskarada lagu daboolayo afka/sanka marka ay joogaan gudaha iyo marka ay ka ag dhow yihiin dadka. Go'aanka ugu dambeeyey ee booqdayaasha iyo mutadawiciinta iskuulada waxaa laga maamuli doonaa meal maristiisa xafiiska maamulaha.

Dabcan, anaku waxaan noqon doonaa kuwa u dabacsan tilmaamaha isbedelada dhacaya iyo inaan ku dhaganaano sidii aan u raadsan lahayn tallooyinka ay bixinayaan khabiirada caafimaadka dadweynuhu. **Tani waxaa ka mid ah kor u qaadista iyo abuuritaanka sidii loo heli lahaa tallaalka COVID-19 kaasi oo lagu kalsooon yahay sidoo kalena waxtar leh.**

Xilgii xaggaagii oo dhan, waxaan si dhow ula shaqeynay hay'adaha bulshadeena iyo saaxiibadayada caafimaadka sidii aanu uga bixino fursado tallaalka ah qaar ka mid ah dhismayaasha iskuuladeena iyada oo aan sii wadi doona la shaqeynta bulshadeena sidii loo siin lahaa fursadahaasi inay ka helaan tallaalka goobaha iskuuladeena.

Waxaanu sugeynaa ansixinta tallaalka caruurta ee da'doodu ka hooseyso 12 sanno iyo qorshe aanu iskaashi kula sameysanayno hay'adaha daryeel bixiyaasha caafimaadka sidii ay diyaar uga dhigi lahaayeen tallaalka ardayda PPS. Wax badan ka ogow dadaaladayada ku saabsan halkan PPS.net/COVID-19Vaccination.

Ma sugi karno inaan ardaydayadii iyo macallimiintii aragno wax ka yar dhowr todobaad!

<u>Su'aalo? Faalooyin?</u>
<u>Aynu Wada Hadalno</u>